




# Home Link - Somali



## Home Links Xiriirinta Guriga Cutubka 5aad: Hoosaska iyo Humaagyada: Isbuuca 5aad

Qoysaska Qaaliga ah: Cutubkani wuxuu cunuggaagu baran doonaa hoosaska iyo humaagyada. Isku day ugu yaraan saddex kamid ah hawlaha waxbarasho ee xiisaha leh, ama dhamaantood samee! Waxa ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato wakhtiga yar ee uu cunugaagu wax ku baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midabee sanduuqyada hawlaha aad doorato, kuna soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota. **XARAABEYSO!**

Magaca Ilmaha: \_\_\_\_\_

### Qorista

**Gabay:** Kani waa gabay ilmahaagu yaqaano.

#### **Raindrops**

Raindrops, raindrops  
falling all around!  
Pitter-patter on the ground.  
Here is my umbrella.  
It will keep me dry!  
When I go walking in the rain,  
I hold it up so high.  
Pitter-patter, raindrops  
Falling from the sky!  
Here is my umbrella  
to keep me safe and dry!  
When the rain is over  
And the sun begins to glow,  
Little flowers start to bud  
And grow, and grow, and grow!  
- *Qarsoodi*

### Daahfur

**Wax soo Ururinta:** (La xidhiidha *The Puddle Pail*)

Kala hadal ilmahaaga wixii isaga/iyadu jecel yahii inay soo aruuriyaan (dhagaxyada, Furka dhalooyinka, qoryo, laastikata iwm.). Soo hel weel oo waxad ka bilowdaa uririnta walxaha.

#### **Bilowga Wadahadalka:**

- Maxay yihiin waxyaabo aad jecleaan lahayd inaad soo aruuriso?
- Imisa ayaa yaal halkaas?
- Muxay bay ururintaadu kaaga sheegi doonaa qof wax saabsan adiga iyo waxyaabaha muhiimka kuu ah?

**Ereyada loo Isticmaalo inta Lagu Jiro Wadahadalka:** *mid ah uruurta, ururinta, kooxaha, kala sooca*

### Hadal iyo Akhris Wadajir Ah (20 daqiiqadood)

#### **Lagu bilaawayaasha Wadahadalka:**

- Maxaad u maleynaysaa in buuggani ku saabsanaan doono?
- Waa maxay qeybta aad ugu jeceshahay sheekada?
- Waa maxay waxa ugu horreeya ee ku dhaca sheekada?
- Maxaad u maleyneysaa inay dhici doonto marka xiga?
- Shakhsiyaadka sheekada kee baad u jeceshahay?

### Luuqadda

#### **Dhawaaqa hore ee xarfaha:**

Isticmaal walxaha aad soo ururisay usbuucii hore ama soo ururi alaab kala duwan oo ku hareereysan gurigaaga. Weydii ilmahaaga inuu qaato wax, oo magaca waxaas sheego, una kuu sheego xarfka / dhawaaqa ay ku bilaabmeysa. Tusaale ahaan, "Dhagaxu (Rock) wuxuu ka bilowdaa R oo wuxuu sameeyaa codka /r /."

## Xisaab

### **Mas'alooyinka Isticmaalka Faraha:**

U sheeg ilmahaaga inuu ku xalliyo masalooyinka fudud oo ku daris ah isagoo isticmaalaya faraha. Waxaad dhahdaa, "Waxaan jeclaan lahaa inaan iibsado saddex baabuur oo caruurto ku yaarto oo yaryar iyo laba baabuur oo carruutu ku ciyaarto oo waaweyn." Weydii, waa "Imisa gawaari isku dar?" U sheeg ilmahaaga inuu saddex farood ku tuso hal gacan iyo laba farood gacanta kale ka dibna isku daraan. Isku day laba mas'alo oo kala duwan.

### **Bilowga Wadahadalka:**

- Intee le'eg yihiin tahay isku dar?
- Sidee baad ku garanaysaa?

## Diiwaanka Akhrinta

Calaamadee maalin kasta adiga iyo cunugaaga aad sheeko wada akhrisaan. Buugaagtu waxay noqon karaan Af Ingiriis ama luuqada gurigaaga. Booqo Maktabadda Dadweynaha Boston saad u hesho buugaag wanaagsan oo ku saabsan hoosaska iyo humaagada.

Isniin \_\_\_\_\_ Talaado \_\_\_\_\_ Arbaco \_\_\_\_\_ Khamiis \_\_\_\_\_ Jimco \_\_\_\_\_ Sabti \_\_\_\_\_ Axad \_\_\_\_\_

### **Buugaga aan ku akhrino dugsiya:**

*The Puddle Pail* oo u qoray Elise Kleven  
*Dreams* oo u qoray Ezra Jack Keats

### **Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laga yaabo in aadjeclaataan:**

*Guess Whose Shadow?*  
oo ay qoray Stephen R. Swineburne

## Tallooyinka si Wadajir ah u Akhrinta:

- Wada fadhiista meel xasilloon oo degan.
- Marka aad akhrinayso, iftiimi oo qeex erayada cusub. Tusaale ahaan, "Humaaggu waa sawir ay sameeyeen waxa dhalaala."
- Marka aad akhrinayso, weydii ilmahaaga su'aalaha ku saabsan buugga. Tusaale ahaan, "Waa maxay qeybtaad ugu jeceshahay riyada? Sababtee?"